# GUDDIGA TAKOORIDDA

# Guddiga takooriddu wuxuu awoodaa inuu mabnuuco takooridda ku salaysan asalka uu qofku ka soo jeedo

Guddiga takooriddu wuxuu ka kooban yahay gudoomiye iyo lix xubnood oo kale, qof walba oo xubin ahna wuxuu leeyahay qof metela markuu maqan yahay. Guddiga takooriddu wuxuu leeyahay qof xoghayn ah oo shaqaale buuxa ah iyo soo bandhige marka loo baahdo shaqada qabta iyo weliba shaqaaleyaal caawiyeyaal ah. Gudoomiyaha iyo xubnaha guddigu waa dad markii loo baahdo shaqada qabta oo ah dad xil bulsho ahaaneed hawsha u qabta.

Gudoomiyaha iyo xubnaha guddigu muddada ay jagada hayaan waa afar sano.

Gudoomiyaha iyo ugu yaraan saddex qof oo xubnaha guddiga ka mid ah iyo markay iyagu maqan yihiin dadka metela iyo xoghayntu, waa inay ahaadaan dad noqon kara garsoore maxakamadeed (dad buuxinaya shuruudaha looga baahan yahay garsooraha). Waxaa kaloo loo baahan yahay, in xubnaha guddiga iyo markay iyagu maqan yihiin dadka metelaa iyo weliba soo bandhiguhu yihiin dad aqoon fiican u leh hawlaha guddigu u xilsaaran yahay.

Xeerarka sharciga ee khuseeya guddiga takooriddu waxay ku qoran yihiin sharciga isku mid ahaanshaha (yhdenvertaisuuslaki 2004/21) iyo sharciyada la dejiyey ee ku saabsan wakiilka dadka laga tirada badan yahay iyo guddiga takooridda (2001/660 iyo 2004/22) iyo weliba xeerka golaha wasiiradu dejiyey ee ku saabsan falanqaynta uu guddiga takooriddu ku samaynayo arrinka (2004/117).

Guddiga takooriddu wuxuu arrimaha takooridda ah ka bixiyaa go'aamo takooridda mabnuucaya oo ay sharci ahaan waajib tahay in lagu dhaqmo.

Guddiga takooriddu waa qolo sharciga isticimaasha oo madax bannaan oo aan cidna ku xidhnayn, golaha wasiirada ayaana u doortay inuu ilaaliyo sharciga isku mid ahaanshaha in lagu dhaqmo. Shaqada guddiga takooriddu waa inuu si sharci ahaan ah u difaaco qolyaha dareemaya in loo takooray asalka ay ka soo jeedaan dartiis.

Guddiga takooriddu wuxuu go'aan uu takooridda ku mabnuucayo ka bixin karaa takooridda arrimaha shaqada la xiriirta mooyee noocyada kale ee takooridda, wuxuuna go'aankiisa uu arrinka ku mabnuucayo ku sii xoojin karaa hanjabaad ganaax ah, haddii go'aanka mabnuucidda ah lagu dhaqmi waayana, guddigu wuxuu amar ku bixiyaa in qoladii ganaaxa loogu hanjebey ay bixiso ganaaxa. Go'aanka uu guddiga takooriddu gaaro waa laga dacwoon karaa oo maxakamadda maamulka ayaa laga dalban karaa inay go'aanka beddesho.

Labada dhinac ee arrinku ka dhexeeyo hadday heshiiyaan, guddiga takooriddu wuu ansixin karaa heshiiska.

Haddii maxakamadda ama wakiilka dadka laga tirada badan yahay ama shaqaale kale oo dowladeed ama urur shacab ah ka soo codsado, guddiga takooriddu wuxuu bixin karaa warbixin ku saabsan siday tahay in loo isticimaalo sharciga isku mid ahaanshaha, markay jirto arrin ku saabsan takoorid.

Guddiga takooriddu wuxuu xaq u leeyahay inuu dhegeysto aqoonyahannada iyo inuu dalbado warbiximo iyo sharraxaado iyo weliba inuu qabanqaabiyo soo fiirin.

# Codsi u qorashada guddiga takooridda

Qofka lagu sameeyey ficilka la leeyahay waa takoorid ayaa arrinka u gudbin kara guddiga takooridda si uu u falanqeeyo oo u baaro.

Wakiilka dadka laga tirada badan yahayna wuu dalban karaa in guddiga takooriddu arrinka baaro.

Codsi qoraal ah ama elektoroonig ah ayaa lagu dalbadaa in arrinka la baaro.

Codsiga waxaa lagu soo qori karaa af Finnish, af Iswiidhish, af Saame ama af Ingiriis.

Qofka tabanaya in takoorid lagu sameeyey waa inuu soo bandhigaa wax cad oo keenaya in la dhihi karo waa suuragal in qofka takoorid lagu sameeyey.

Codsiga waa inay ku qoran yihiin ugu yaraan waxyaabahan soo socda:

- Qofka codsadaha ah magaciisa iyo meesha lagala soo xiriiri karo
- Qofka wax laga tabanayo magaciisa iyo meesha lagala soo xiriiri karo
- Sharraxaad ku saabsan siday takooridda la sheegayaa u dhacday
- Markhaatiyaal hadday jiraan, waa in codsiga lagu soo qoraa hadalkooda ku saabsan siday wax u dheceen
- Maxay tahay sababta qofka dacwoonayaa uu ugu arko in asalka uu ka soo jeedaa yahay sababta keentay in takoorid lagu sameeyo.

Marka arrinka takooridda ku saabsan la falanqaynayo, xeerka ah cidda ay tahay inay caddayso arrinka la leeyahay wuu dhacay waxaa loo isticimaalaa siduu dhigayo sharciga isku mid ahaanshaha qodobkiisa 17 §: Haddii qofka codsiga soo qortay soo bandhigo waxyaabo muujinaya in loo malayn karo in la sameeyey takooridda uu mabnuucayo sharciga isku mid ahaanshaha qodobkiisa 6 §, qofka laga soo dacwooday bay waajib ku tahay inuu caddeeyo in aanu mabnuucidda jebin.

Guddiga takooriddu habka uu arrimaha u falanqeeyaa waa qoraal ahaan.

Guddiga takooriddu wuxuu qabanqaabin karaa in si hadal ahaan ah arrinka loo falanqeeyo ama soo fiirin la sameeyo, haddii ay noqoto in sidaas loo baahan yahay, si loo ogaado siday wax u dheceen.

Falanqaynta uu guddiga takooriddu arrinka falanqynayaa waa lacag la'aan.

Codsiga waxaa lagu hagaajiyaa cinwaanka guddiga takooridda:

**SYRJINTÄLAUTAKUNTA**
**PL 26**
**00023 Valtioneuvosto**
E-mail: syrjintalautakunta@intermin.fi

# Tusaalooyin ku saabsan noocyada takooridda ee guddiga takooriddu mabnuucay

- Baar baa loo diidey inay soo galaan, sababtuna waxay ahayd asalka ay ka soo jeedeen
- Dugsi hoose/dhexe ayaa ilmo fasal u geeyey asalkiisa oo ajnebi ah dartiis, iyadoon ilmaha heerka aqoontiisa luuqadda loo tijaabin si nidaamka waafaqsan
- Waaxda arrimaha bulshada iyo caafimaadka ee degmo ayaa siday wax u qabanaysey baa waxay ahayd mid keeneysey in si xun loola dhaqmo oo takoorid u geysaneysey aabbe ah dadka waddanka u soo guurey
- Shirkad caymiska ah ayaa markay ogolaanayso kharashka caymiska jirradu bixiyo, baa waxay isticimaashay nidaam si dadban u takooraya dadka aan dhalashada Finland lahayn, maadaama hababka ay shirkadda caymisku isticimaalaysey ahaayeen kuwo aan haboonayn oo aan lagama maarmaan ahayn, wararka ay shirkadda caymisku u baahnaydna waxay ahaayeen kuwo si la qabli karo loo heli karo, marka laga eego dhinaca isku mid ahaanshaha
- Degmo ayaa guryo bannaan siin weydey dad guryo la'aan ah oo guryo dalbaday, sababta ay u siin weydeyna waxay ahayd asalka ay dadku ka soo jeedeen.
- Dukaan dharka lagu iibiyo ayaa adeegiisu wuxuu ahaa mid takoorid ku samaynaya dad macaamiil ahaa oo asal khaas ah ka soo jeedey
- Degmo ayaa shirkadeeda guryuhu waxay dad asal khaas ah ka soo jeeda ku xirtay shuruudo aan lagu xirin dadka guryaha codsanaya ee ka tirsan asalka ay dadka waddanka u dhashay intooda badan ka soo jeedaan
- Magaaladu ma aanay muujin inay si ku filan isugu dayday inay ka soo baxdo waajibka sharci ahaan saarnaa oo ahaa inay carruurta Saame ah u qabanqaabiso xannaano maalmeed nidaamka waafaqsan, maadaama ay siday carruurta afkooda hooyo Finnishka yahay xaqa ugu lee yihiin xannaano maalmeed afkooda hooyo ah ay carruurta Saameha ahna xaq ugu lahaayeen inay helaan xannaano maalmeed afkooda hooyo ah
- Degmo ka tirsan deegaanka Saame ayaa muujin weydey inay si ku filan isugu dayday inay dadka afkooda hooyo Saame yahay u qabanqaabiso adeegyo daryeelka caafimaadka ah iyo adeegyo daryeelka waayeelka ah iyo waxbarashada aasaasiga ah oo ah af Saame
- Magaalo iyo shirkadeeda guryaha ayaa markay dadka Roomaanka ah guryaha siinayso waxay ku dhaqmi jirtey nidaam ah in iyadoo la isticimaalayo qof Roomaan ah oo magaalada deggan la soo ogaado, in bulshada Roomaanka ah ee magaalada deggan raalli ka yihiin in qofka Roomaanka ah ee guriga soo codsaday uu magaalada u soo guuro iyo in bulshada Roomaanku raalli ka yihiin in qofkaas la siin karo guryaha qaarkood

Go'aamada uu guddiga takooriddu gaadhey waxay ku qoran yihiin oo lagu arki karaa bogga internetka ee cinwaankiisu yahay: www.syrjintalautakunta.fi

**Syrjintälautakunta, PL 26, 00023 Valtioneuvosto**
**E-mail:**
**syrjintalautakunta@intermin.fi**
**Bogga internetka:**
**httpp://www.syrjintalautakunta.fi**